Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

Farriintani ayaa la soo geliyay onlaynka iyadoo ku qoran af اللغة العربية, English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

5-ta Maayo, 2025

**Ku socota**: Xubnaha bulshada I/DD, la hawlgaleyaasha Qabaa'ilka iyo shaqaalaha ODDS

**Ka socoto:** Dana Hittle, Agaasimaha Kumeelgaarka ah, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (Office of Developmental Disabilities Services, ODDS)

**Mawduuca: Soojeedinta La Shaaciyay ee Dib-u-nashqadaynta Qaybta Xasillinta iyo Xasaradaha (Stabilization and Crisis Unit, SACU)**

Maanta, waxaynu soojeedin u dirnay Sharci-dejinta Gobolka Oregon. Qorshaha la soo jeediyey (Ingiriisi kaliya) wuxuu ku saabsan yahay ku samaynta isbeddelo Qaybta Xasillinta iyo Xasaradaha (Stabilization and Crisis Unit, SACU). SACU waxay caawisaa dadka qaba Naafanimada Garaadka iyo Korriinka (I/DD) iyo baahiyaha caafimaadka habdhaqanka kuwaasi oo ay dhibaato haysato.

Waxaanu rumaysannahay in dadka qaba I/DD, xataa kuwa qaba baahiyaha adag, inay ku noolaan karaan kuna baraari karaan bulshada dhexdeeda hadday helaan taageero sax ah.

**Waxa Qorshuhu Soo Jeedinayo**

Qorshuhu wuxuu ka kooban yahay laba soojeedin oo muhiim ah:

- Dib ugu laabo ujeedDadii asalka ahayd ee SACU – caawinta dadka dhibaatada ay haysato muddo kooban iyo kadib ka taageerida inay ku laabtaan bulshada.
- U abuurista nidaam cusub adeegyada iyo taageerooyinka xasaradaha ka jira gobolka oo dhan – si markaa dadku u heli karaan taageerada gaarka ah ee ay u baahan yihiin, goorta ay u baahan yihiin, iyagoo u maraya nidaam si fiican la iskugu dubbariday.

**Cidda Gudbisay Qorshaha**

Qorshaha waxa sameeyey koox loo yaqaano Kooxda Adeegyada Aadanaha (Human Services Group, HSG). HSG waa koox la-talin oo madax-bannaan oo ay shaqaaleeyeen Waaxda Oregon ee Adeegyada Aadanaha (Oregon Department of Human Services, ODHS) si ay u darsaan SACU, ula hadlaan bulshada qabta Naafanimada Garaadka iyo Korriinka, una soo jeediyaan isbeddelo. Guddoomiye Kotek ayaa codsatay shaqadan markii ay nala wadaagtay qorshaheeda miisaaniyadeed ee 2025–2027 dhammaadkii sanadkii hore.

**Waxa Ay Dadku Ka Dhaheen**

HSG waxay la hadleen in ka badan 280 qof si ay uga caawiyaan dejinta qorshaha. Dadka intooda badan waxay isku raaceen in SACU ay ahayd

inay diiradda saarto daryeelka xasaradaha muddada gaaban iyo isku duwidda dadka deggan xaruntooda inay dib ugu laabtaan bulshada, iyagoo u diyaar ah inay ku noolaadaan nolosha ay rabaan.

Waad mahadsan tihiin kuwiina aaday doodaha kooxeed ama waraysiga si aad noola wadaagtaan jawaab-celintiina qiimaha badan. Kaqaybqaatayaasha waxaa ku jiray:

- Isu-doodeyaal
- Dadka deggan SACU
- Xubnaha qoyska, mas'uuliyiinta iyo taageerayaasha dadka deggan xarunta SACU
- Dadka ka shaqeeya SACU iyo qaybaha kale ee ODDS
- Bixiyayaasha adeegga ee ka socda bulshada
- Hoggaanka ururada shaqaalaha
- U-doodayaal iyo dad kale

**Waxa La Wanaajin Karo**

Si loo horumariyo SACU, Oregon waxay u baahan doontaa inay diirada saarto:

- Buuxinta daldaloolada adeegga ee bulsheed
- Yeelashada qorsheyayaal kala-guur oo loogu talagalay marka dadku ka baxayaan qaybta SACU
- Wax ka qabashada awoodda xirfadeed ee shaqaalaha iyo bixinta tababar iyo taageero shaqaale oo dheeraad ah
- Waafajinta dhaqanka iyo hawlgallada SACU jaangoynta Adeegyada Lagu Baxsho Guriga iyo Bulshada Dhexdeeda (Home and Community-Based Services, HCBS)

- Horumarinta isku dubbaridka kala dhexeeya nidaamyada kale

**Waxa Xiga ee Dhici Kara**

Sharci-dejiyayaasha Gobolka ayaa eegi doonaan qorshaha oo go’aan ka gaari doona waxa laga yeelayo. Hadday ansixiyaan isbeddelada, ma bilaabi doonaan ilaa laga gaarayo Luulyo 2026. Taasi ayaa na siinaysa wax ka badan sanad si aanu isku wada diyaarino oo aan u wadashaqayno.

**Xog-ogaal Ahaw**

Waxaad ka akhrin kartaa wixii soo kordha mareegtayada ama la soco farriimaha ka imaanaya Xafiiska Agaasimaha ODDS. Waxaanu rabnaa SACU inay qayb ka ahaato nidaam wayn oo caawiya dadka xilliga xasaradaha kana taageera inay ku baraaraan bulshadooda dhexdooda. Waanu ku faraxsannahay inaan adiga kula shaqayno –- bulshada qabta Naafanimada Garaadka iyo Korriinka — si aan u horumarino SACU, oo u noqoto meel qaddarin, caddaalad, iyo u-dhannaansho leh.

Daacadnimo,



Dana Hittle

Agaasimaha Kumeelgaarka ah

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (Office of Developmental Disabilities Services, ODDS)

Isku diiwaangeli wargelinada xafiiska ODDS.

Ka akhri farriimaha Agaasimaha ODDS barta https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm.

Nagala soco Facebook-ga @oregonDHS.IDD.

Dukumeentigan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. Iimayl ku dir dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov ama wac 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.